

Waa maxay hay'da caalamiga ee dadka hijrooda ee loo soo gaabiyo (IOM)?

IOM waa hogaanka hay'da caalamiga ah ee dadka hijrooda. Mid ka mid ah dariiqyada aan ku caawino dadka soo hijrooda ayaa ah caawimaad aan u fidino dadka ayagu doonaya iney si madax banaan iskood dib ugu noqdaan wadankoodii hooyo. Adeegaasi ayaa loogu yeeraa Gargaarka iskood dib u guurayaasha, ama luqada qalaad lagu yiraahdo Assisted Voluntary Return (AVR).

Maxay IOM kugu taageeraysaa?

Adeega IOM ee gargaarka iskood dib ugu guurayaasha wuxuu ka caawiyaa shaqsiyaadkaasi inay dib ugu laabtaan wadankooda hooyo si nabadgelyo oo sharaf leh. Hadii aad dooneyso inaad dib ugu noqoto wadankaaga IOM waxay kaa caawin kartaa:

- Waxay kaa kaalmaynaysaa macluumaad la xiriira waqtiga safarka ee bixitaanka aad baxayso;
- Qaabeynta ama isku duba ridida safarkaaga oo dhan eed ku tageyso wadankaagii hooyo;
- Waxay kaa kaalmaynaysaa madaarada aad ku sii hakanaysid (transit) iyo wadankaaga marka aad gaadhidba;
- Hadii ay ka suurtoobayso wadankaaga, waxaad heli doontaa kaalmo dib ula qabsasho ee wadankaaga.

Kuma ayaa dalban kara?

- Qofka soo hijroodey ee rajaynaya inuu dib ugu noqdo wadankiisii/wadankeedii hooyo;
- Dawlada Finland ayaa go'aamin doonta in hayada IOM diyaarin karto safarkaaga iyo sidoo kale inaad

xaq u leedahay waxoogaa kaalmo dhaqaale ee lagugu taageerayo.

Qaab caynkee ah ayuu barnaamijka gargaarka iskood dib u guurayaashu u shaqeeyaa?

Hadii aad doonaysid inaad dib ugu laabatid wadankaagii:

1. waa inaad heshaa foomka gargaarka iskood dib u guurayaasha kaasoo aad ka heli karto xafiiska sooshalka, booliiska amaba ka soo guuri halkan, <http://www.iom.fi/avr/forms>

2. shaqaalaha sooshalka ama booliiska ayaa kaa caawin kara buuxinta foomkan. Dhamaystir buuxinta foomka una soo dir adigoo soo raacinaya koobiga dukumentiga aad ku safraysid xafiiska IOM ee Helsinki qaab fakis, e-mail ama boosto.

3. IOM waxay kaa caawin kartaa helitaanka dokumentiga aad ku safraysid hadii aadan lahayn;

4. IOM waxay kuu heli doontaa taariikhda kuugu haboon ee safarkaaga iyo samaynta waxyaabaha lagama maarmaanka ah ee iskuduba ridida safarkaaga;

5. Marka la xaqiijiyo taariikhda aad baxaysid, xubin shaqaalaha IOM ayaa kugula kulmi doonta airboorka kaasoo kaa caawin doona gelida diyaarada;

6. shaqaalaha IOM waxay ku caawinayaan mudada safarkaaga oo dhan.



The image shows a screenshot of the Assisted Voluntary Return (AVR) application form. The form is titled "ASSISTED VOLUNTARY RETURN YAPAAHTYTONEN PALUUS (AVR)" and "General". It includes fields for personal data, family name, date of birth, place of birth, and contact information. There are also checkboxes for "I am a refugee" and "I am a returnee".



Cidee ayaan kala soo xiriiri karaa macluumaadka dheeraadka ah een u baahdo?

→ Shaqaalaha sooshalka ee xarumaha xeryaha qoxootiga iyo degmooyinka

→ Booliiska deegaanka

→ Xafiiska IOM Helsinki

IOM Helsinki

Unioninkatu 13, 6th floor
P.O. Box 851
FIN-00101 Helsinki

→ IOM Helsinki web pages

→ <http://www.iom.fi>

→ <http://www.iom.fi/avr>



Telefoon: (09) 684 11 50
Faksi: (09) 684 11 511
E-mail: mrfhelsinkiavr@iom.int

IOM Saacadaha shaqada: Isniin-Jimce 9-17

Juunyo 2007

Shaqaalaha IOM oo ku sugaya qof soo noqdey
madaarka Kabul © IOM 2004



La safiid IOM
© IOM Bangkok



IOM Helsinki –
Xafiis goboleedka wadamada Noordiga iyo kuwa
Baaltiga, iyo wadama jaarka ee yurub (Bariga)

Unioninkatu 13 • 6th floor • P.O. Box 851
FIN-00101 Helsinki • Finland

Telefoon.: +358-9-684-11 50
Faksi: +358-9-684-11 511
E-mail: mrhelsinki@iom.int



IOM International Organization for Migration
IOM Kansainvälinen siirtolaisuusjärjestö
IOM Internationella migrationsorganisationen

Gargaarka dadka iskood dib uga guuraya Finland



Afsoomaali/Somali



IOM International Organization for Migration
IOM Kansainvälinen siirtolaisuusjärjestö
IOM Internationella migrationsorganisationen